**SHARCI - Lamb. 70 ee 22 Nofeember 1970**

**MADAXWEYNAHA**

**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii laga baaran degay oggolanshaha Golaha Sare ee Kacaanka.

**WAXAA LA AMRAY**

Sharciga hoos ku qoran:

## MADAXA 1AAD
## DHISMAHA, HOWSHA, AWOODA IYO XUQUUQDKA WAKAALADDA DEKEDAHA

### Qod. 1
### Wakaaladda Dekedaha Somaliyeed

1. Wakaaladda Dekedaha Soomaliyeed waxaa lagu dhisay Sharciga lamb. 19 ee 14 Juun 1962, waxa u shaqeysaa si madax banan oo lagu maamulo nidaamka sharcigaan iyo xeer nidaamiyaha la xiriira;
2. Wakaaladda Dekedaha Somaliyeed waxaa lagu maamuli doona Shargica lamb. 16 ee 1da Abriil 1970 (Sharciga Wakaaladaha madax banana).

### Qod. 2
### Kormeerka

1. Wakaaladda Dekedaha Somaliyeed waxaa aay hoos tegi doonta kormeerka Xoghayaya Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka;
2. Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka wuxuu siin doona Wakaaladda Dekedaha amarrada loo baahan yahay si loo hubsado in ay fulineyso danta guud ee dowladda.

### Qod. 3
### Ujeedooyinka

Ujeedada Wakaaladda waa in ay horumarisaa dekedaha Jamhuuriyadda sidas awgeedna waxay yeelan doonta awoodaha halkaan ku tixan:

1. Maamulka xeendaabka dekedaha oo dhan iyo hantida guurtada iyo midda ma gurtada ah ee Wakaaladda;
2. Dhismaha, dib u habeynta iyo gacan ku haynta furdadaha iyo qalabka ay ku shaqeeyaan;
3. In ay hirgeliso howlaha maraakiibta sida:
    a) Howlaha adeega rariidda iyo tarifadooda;
    b) In la kormeero badmaaxinta dekedaha dhexdooda iyo habka loo soo xiririiyo maraakibta;
    c) Dhismaha, dib-u-habeynta, iyo gacan ku haynta iyo maamulidda baqaradda, maqaayadaha, baarkaka iyo adeegyada kale ee uu howsha furdadada ay u baahan tahay;
    d) Hirgelinta adeeg kasto ee xeendabka furdooyinka loogaga baahdo;

4. Adeeg kasto ee ku qoran qodobkaani oo si toos ah Wakaaladuu ay u fulin karto ama loo xilsaari karo hey'ad seddaxaad.

**Qod. 4**
**Awooda Wakaaladda**

Wakaaladdu, iyadoo la dhowraayo xeendaabka sharcigaan, waxaay yeelan doontaa awood kasto ee lagu gaari karo ahmiyadeeda.

**Qod. 5**
**Xuquuqda Wakaaladda**

1. Wakaaladdu waxay ka faa'ideysan doonta xuquuq gaar ah markii ay gudaneeyso wajiibaadkeeda.
2. Xuquuqdaasi oo ku qoran faqradda sare waxaa lagu carifi doonaa Dekreeto oo uu soo saray Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka.

**Cutubka 2aad**
Qab Dhismada

**Qod. 6**
**Xubnaha Wakaaladda**

1. Xubnaha Wakaaladda waxaa ka mid ah:
   a) Guddomiyaha Guud ee Furdooyinka;
   b) Agaasimayaasha Wakaaladda Dekedaha.
2. Kormeerka xisaababdka Wakaalada waxaa iska leh Xisaabiyaha Guud.

**Qod. 7**
**Magacaabista Xubnaha**

1. Waxaa Dekreeto Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka ku magaacabi doona Guddomiyaha Guud ee Furdadooyinka kadib markii uu la tashtay Xoghayaha Guud ee Isgaarsiinta iyo Gaadidka iyo Golaha Xoghayaasha Dowladda iyo Golaha Sare ee Kacaanka;
2. Agaaasimayaasha waxaa lagu magacaabi doona dekreeto Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka.

**Qod. 8**
**Xil ka qaadiska iyo muddada xilhaynta**

Ciddii loo dhiibay xilka ku xusan qodobka sare ku tilmaaman waxaa laga qaadi kara xilalkooda isla habkii lagu magacaabay.

**Qod. 9**
**Howlaha Guddomiyaha Guud**

1. Guddomiyha Guud ee Dekeddaha waa xubinta wakiil ka ah oo qaabilsan fulinta sidaas awgeedna wuxuu u xil saran yahay howlaha soo socda:

a) Wuxuu geli kara heshiis isagoo metelaaya Wakaaladda;
b) Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta maamulka guud ee Wakaaladda, markii laga reebo shaqalaha laga soo diray dhinaca dowladda, wuxuu qaadan karaa go'aannada daari ah iyo kuwa nidaaminta shaqaalaha Wakaaladda;
c) Wuxuu mas'uul ka yahay hantida Wakaaladda.

2. Haddii uu soo xaadiri waayo, ama caqabado ay jiraan sidii ruqso ama geeri, howlaha Guddomiyaha Guud waxaa si ku meel gaar ah, ilaa iyo intii cid kale loo magacaabi doono jagadaas hayn doono Agaasimaha oo uu magacaabo Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka.

**Qod. 10**
**Shaqaalaha Wakaaladda**

1. Shaqaalaha Wakaaladda waxaa laga soo wareejin karaa jagooyinka Dowladda ama si toos ah ayey Wakaaladdu u qoran doonta.

**Qod. 11**
**Mas'uuliyadda Guddomiyaha Guud, Agaasimayaasha iyo shaqaalaha**

Guddomiyaha Guud, Agaasimayaashu iyo shaqaalaha waxaay xilkooda u gudan doonan mas'uuliyad la mid ahna yeelan doonan shaqalaha Rayida ee Dowladda.

**Cutubka 3aad**
Hantida, Dhulka Xeebta, Amaahda, ka Reebidda Canshuurta, Misaaniyadda, Xisaabinta iyo Kormeerka

**Qod. 12**
**Hantida Wakaaladda**

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay:

a) Keyd lacageed ee dhan 500.000 (shan boqol oo Kun) oo ay Dowladda Jamhuuriyadda Dimuqratiga Somaliya ay ku deeqday si uu noqdo hantida howsha lagu bilaabi doono;
b) Deeq kasto ay oo qeybaha kale ee Dowlada, ama hey'adaha dadweynaha ama Hey'ada Calaamiga iyo kuwa gaarka loo leeyahay ay bixiyaan;
c) Keyd lacageed oo haraag ah oo ka yimid faa'idada qeyb ka mid ah adeega
d) Tarifooyinka iyo canshuuraha laga qaaday ;
e) Lacagaha ka soo gala adeegyaha soo xiriirinta maraakiibta, baqaaradda, naquudnimada;
f) Xaq kasto oo ka dhashay howlaha adeega oo ay Wakaaladdu ka fulisay xeendaabka badda ay leedahay;
g) Daqliga xuquuqda qiimeynta FOB ama CIF ee rarka la dejieyey ama la raray ee dekedaha;
h) Lacag kasto oo hey'adaha dowliga ama kuwa gaarka loo leeyahay ay ku bixiyeen magdhaw kharjaka ama dhibaato loo qeystay dhismaha, qalabta ama ka taxadir la'aanta amarrada daariga iyo teknikada ee furdada;
i) Daqliga ijaarka qalabka guurtada ah iyo kuwa ma guurtada ah ee Wakaaladda;

j) Daqliga ka soo gala ganaaxa ku yimaad u hoggansanaan la'aanta amarrada xeer-nidaamiya dekedaha Somaliya;
k) Daqli kasto oo kale.

**Qod. 13**
**Hantida dhul xeebeedka**

Waxaa si lacag la'aan ah loogu hibeeyey Wakaaladda dhulka xeebeedka ah ee ay ku dhextaalo dekedda, qalaba furdada, kuwaas oo ah hanti ay leedahay Dowladda Somaliyeed ama Dowladda Hoose, iyo xuquuqda dhulka xebeedka.

**Qod. 14**
**Amaahda**

Wakaaladdu, kadib oggolanshada Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka, wuxuu heshiis amaah la geli kara hey'adaha amaahda ee dalka dibediisa ama bangiyada dalka gudahiisa si loo hirgeliyo howlahiisa.

**Qod. 15**
**Canshuur dhaaf**

Fulinta howlgallada Wakaaladda waxay leeyihin canshuur dhaaf.

**Qod. 16**
**Misaaniyad sanad laha ah**

1. Misaaniyadda Wakaaladdu waa sanad leh;
2. Guddomiyaha Guud ee Wakaaladda wuxuu soo hordhigi doonaa Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka misaaniyaddii sanadkii la soo dhaafay ka hor 31 Maarso ee isla sanadkaasi;
3. Xoghayaha Isgaarsiinta & Gadiidka isagoo la tashtay Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda wuxuu ansixi doona misaaniyaad sanadka wuxuu amri doona in la soo qoro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda iyadoo kharjakaasi ay bixin doonto Wakaaladda.

**Qod. 17**
**Qorshaha sanadka**

30 Seteembar ee sanad kasto, wuxuu Guddomiyaha Guud uu dejin doonaa qorshaha guud ee howlaha Wakaaladda ee sanadka soo socda, isagoo tilmaamayo hordhaca kharajka iyo daqliga wuxuuna u gudbin doona si loo aqbalo Xoghayaha Dowladda ee Isgaarsinta iyo Gadiidka.

**Qod. 18**
**Xisaabinta**

Xisaabinta Wakaalada waxaa lagu maamuli doona habtka ay Dowladdu u soo carifto.

**Qod. 19**
**Dib uga noqshada heshiisyada adeegyada, raridda iyo dejinta xamuulka ee u dhexeya Wakaaladda iyo Hey'addaha Somaliyeed, Dejinta iyo rarka iyo COGIU**

1. Iyadoo la eegayo danta guud iiyo yadoo hirgelintiisu tahay mid degdeg ah waxaa laga noqday:

a) Heshiisyada adeegii dejinta iyo raridaa iyo ijaarka qalab iyo dhisidda furdada ee magalaada Muqdisho iyo Marka ee ay leheed Hey'adda Somalida ee Rarka iyo dejinta;
b) Sidoo kale waxaa laga noqday heshiiskii adeega dejinta iyo rarka iyo ijaarka qalabka iyo dhismaha dekedda ee magalada Kismaayo oo ay haysatay Shirkada Somalida ee Dejinta iyo Rarrida SpA COGIU.

2. Hey'adaha iska lahaa heshiisyadaasi ku qoran farqadda sare waxaa magdhaw siin doona Wakaaladda;
3. Howlihi ay Hey'adahaasi fulin jireen waxaa si toos ah u qabn doono Wakaaladda;
4. Muddada iyo qaabka la isaga gudbin doono maamul wareejinta lagu carifay faqradaha sare ku xusan haddii loo baahdo waxaa soo saari doona Guddomiyiha Guud ee Wakaaladda.

**Qod. 20**
**Xeer nidaaminta Wakaaladda**

Xeer nidaamiyaha Wakaaladda waxaa lagu soo saari doona dekreeto Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka kadib talo soo jeedinta Xoghayaha Guud ee Isgaarsiinta iyo Gadiidka.

**Qod. 21**
**Burin**

Waxaa la buriyeye Sharciga lamb. 19 ee 14 Juun 1962 (Dhismaha Wakaalada Furdaha ee Somaliya) iyo xeer kasta oo ka hor imaaneysa ama khilaafsan sharcigaan

**Qod. 22**
**Hirgelinta sharcigaan**

Sharcigaani wuxuu hirgeli doonaa maalinta uu Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanku uu amro.

Muqdisho, 22 Nofeember 1970.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**